# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:15 AM** **Hansard *No*.20/6** **Kal-fadhi 20[aad] fadhiigsa 20[aad]**

***27-28/01/2013***

## ***Dooda Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada, oo ka qeyb-qaaten 10 mudane socoteyna 2 maalmood.***

1. **Md. C/qaadir X Ismaciil Jirde:-** wax badani iigumey hadhin laakiin laba qodob oo yar yar baan wax ka odhanayaa, Wasiirku Baahi buu inoo keeney, waxa weeye baahidu waa gaar, xeerkanina dib u noqon maaye wuxu jideeynayaa wixii takaaliifa iminka wixii ka danbeeya in la qaado hadii la ansixiyo, markaa waxaa ku darayaa:-
   - In wixii hore la keeno oo lagu daro resolution jideynaya in la helo (Auditing Account) bilihii ee la qaadeyay, maadaama xeerkani jideynayn oo aaney sharciyad ku noqoneyn sidaa , inaynu raacino oo nidhaahno ha la keeno wixii hore loo qaadey sidey xisaabtoodu noqotey.
   - Waxaan kaloo ku raacsanahay Guddida iney ka saarto Wasaarada Duulista iyo Hawada sababtoo ah xeer gaarey yeelan doontaa lagu bixin doono oo taasina meesha kuma jirta.
   - waxaan kaloo doonayaa mid ka idhaahdo iyana ninkii French ahaa ee Halkan inoogu yimi hay'aduu ka socdo waxaa la yidhaahdaa Adam Smith International waa hay'add ku caanbaxdey inay wixii macaawinooyina soo fuusho. waxaan hakan ku hayaa maqaal ay qorto daily telegraph oo ay ku magacaabeyso the proness of poverty waad akhrideen baan u maleynayaa lords of poverty, markaa hay'adda noocaas ah ee Macaawinooyinka soo fuulayana in iyagana bal Goluhu wax ka yidhaahdo oo waxaa jirta Guddi Arrimaha Dibada iyo iskaashiga Caalamiga oo tahay bal Hay'addaa iney wax ka tidhaahdo Golaha, Intaasaan Ku soo gaba-gabeynayaa, waad mahadsantihiin.
2. **Md. Xuseen Ismaciil Yuusuf:-** waynu maqleynay Wasiirkii iyo ninkii French ahaa waxay halkan ka akhriyeen, waxa ay ku saabsaneyd nidaaminta madaarka iyo dadka u shaqeynaya, securitygiis, Sidaa darteed ayay inoo sheegen inay $10 qaadaan, Guddiduna waxay inoo soo bandhigtey waxay ka qabto.

Marka ugu horeysa waxaynu Qaran ku nahay waa cashuurahan, deymanka, mucaawinooyinka iyo khadimaadka kale ee aynu qaadno, Sanadkan xataa waxaa ku jirtey Zakada in lagu daro budgetka, waxaas oo dhan waxaynu ku magacawnay (budget) Miisaaniyad bulshada loo adeegayo, meelkale oo wax maraan ma jiro, kamaan arkeynin, Guddideena dhaqaaluhuna wax kamey odhan, Wasaaradu ma sheegin in lacagta lagu darayo Miisaaniyada, waxaa anigu qabaa, oo soo jeedinayaa:-

- In marka ugu horeysa lacagtani Budgetka gasho, oo aan si gaara loo ururin, waxaan miisaaniyada galina xaaraan weeye. Sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa, Lacagtu waa iney budgetka gashaa.
- Guddida waan raacsanahay waxay wax ka badaleen oo aaney ku jirin halka ay yidhaahdeen **$10** waxaan soo jeedinayaa in **$5** kaliya laga dhigo.
- In Wasaarada Duulista iyo Hawadu keento 5 bilood ee hore wixii la qaadey iyadoo audited ah, oo shantaa bilood ee hore barlamaanka la soo hordhigo lacagta la qabtey iyo sidey ku baxdey oo waan ku raacsanahay Xildhibaankii iga horeeyay.
- In Sanadka 2013-2014 in Wasiirku supplementary budget ku keeno iyadoo isu dheeli tiran.
- Hadii Wasiirku sheegtey in uu haysto shaqaale well paid ah oo tababaran amniga daraadii, lacagtaa uu budgetka ku soo aroortey wuu la bixi karaa oo (Advancing Account) buu kula bixi karaa, financial regulationkuna wuu ogolyahay, isagoo soo ururinaya ayuu dhinacan kale kala bixi karaa oo khasnadiisana way ku jiri kartaa, laakiin waa wax u xisaabsan Hanti-dhowraha Guud iyo Xisaabiyaha Guud, $10 qardo jeex raaca maaha, wixii aan budgetka ku aroorin eed kama fogaato iyo gacmo, markaa embrace account loo ogolaado oo auditka iyo account ha ogaadaan.

3. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** marka hore waan idin salaamayaa, inta aan qodobada Xeerka u galin, waxa weeye laba arrimod in la kala saaro, waxa weeye mudadii wasaarada la daba socdey ee lacagtan ay qaadan iyo

maanta oo xeerkii lacagtaa lagu dhaqayay uu ina horyaalo horta waa inaynu kala garanaa.

Hadaan Xeerka u soo noqdo, ereyga ***Xukuumada*** micnihiisu wuxuu hambaarsan yahay kuma jirto xeerka erey bixintiisa, magaca xukuumadna waa wax xambaarsan wasaarado fara-badan iyo hay'ado, Xeerkuna waa wax cid ku shaqeynayso, markaa waxaan soo jeedinayaa ereyga Xukuumada in lagu badalo Wasaarada oo erey bixintana ku jirta xeerkan cida ku dhaqmeysaa waa wasaarad ama hay'ad.

Hadaan wax ka badalkii Guddida dhaqaalaha eego, **Qodobka 4aad** ee ay ka dhigeen dada qofka 15 jirka ah, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo halkaa, "*Qofkasta oo document lagu safro sita*" **Qodobka 5aad** halka **Xukuumada** ay ku taalo waxaan ku badaley "*Wasaarada iyo hay'adaha hoos yimaada ama heshiis la gasho*", **Qodobada 6aad iyo 7aad** waxaan u daayay sidii xeerka Xukuumadu soo gudbisey ugu jireen.

Qodobka 8aad ee Xeerka laga saarey, waxaa jira Hay'ad kasta oo jirta aduunka oo aan ahayn booliiska, waxay leeyihiin Xeer-nidaamiyayaal ay ku shaqeyaan, markaa Qodobkana halagu soo celiyo.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Xeerka sidii Xukuumadu ku soo gudbisey loo daayo, oo lagu ansixiyo.

4. **Md. C/laahi Xuseen Cige:-`**

   ***Anigu waxaan soo jeedinayaa:-***

   - Madaama ay lacagta soo gashey ee $10 ka badan tahay kala badh miisaaniyadii Wasaarada waa in la raadiyaa halka ay lacagtaasi ku dhacdey iyo halka ay martey laguna soo daro miisaaniyada

5. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Mudanayaasha iyo Shirgudoonkaba waan salaamayaa, waxaan jeclahay horta inaan u mahadnaqo xildhibaanadii iga horeeyay iyo Guddida dhaqaalaha ee Xeerka soo

daraasadeeyay, waxaa marka hore muhiima horta inaan kala saarno waxa ina horyaal iyo Miisaaniyada Wasaarada, Maanta waxaa in horyaal Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Somaliland.

Marka ugu horeysa aynu is-weydiino baahida keentay iyo waxa sababey in takaaliifta noocan oo kale ah lagu soo rogo dadka madaarada ka dhoofaya, marka aad fahamto macnaha ay ku timi iyo asbaabaha xeerkani uu xambaarsan yahay iyo baahida keentay in la jideeyo, waxaa kuu, wax qabad badanina ka muuqdo runtii intii ay jirto, waxaynu la soconey xaalada Madaaradeena iyo Amnigoodu siduu ahaa, waxaan la soconey in dalalka jaarka aynu nahay diyaaradaha ka yimaada oo ay Ethiopian airline ka mid tahay ay u joojiyeen duulimadyadii ay wadanka ku iman jireen amni xumo darteed, waxaynu qiyaasi karnaa mudadii sidii wasiirkuba halkan ka sheegay lacagahan la qaadayay isbadalka ku yimi amniga guud ahaan madaarada dalka, waxaynu garanka dal amniga madaaradiisu sugneyn in khatartiisu fara-badaneyso amniguusuna meel xun ku sii socda.

Sidaa darteed, waxaynu odhan karnaa mudadii $10 la qaadayay waxay soo kordhisey wax weyn oo wax ka taray xaalada guud ahaan Amniga Qaranka wanaajiseyna madaarada dalku sidey ahaayeen.

Hadeynu taa ka nimaadno, Xeerkan Takaaliifta Amniga Madaarada, lacagtaasi markii hore sifo sharciya laguma qaadi jirin, Golahana ma soo marin, waxayna ahayd asbaab khaldan iyadoon Golahan laga ansixin in muwaadiniinta lagu soo rogo lacago noocan oo kale ah, hase ahaatee ahaatee iminka wuxuu haystaa dhabihii sharciga ahaa, madaama xeerkiina gacanta ku hayno doodiisiina ay taalo, wixii soo jeedimaha in la isku eeg-eego ay tahay, laakiin la isku raacsan yahay sifihiisa xeerkaa ay ka muuqato in loo baahanyahay.

Waxaa halkan la inooga sharaxay mudadii lacagtaa la qaadayay dakhligii soo galey intuu ahaa iyo sidii ay kala baxdey hadii aynaan ilawsanayn oo agaasimaha iyo wasiirkuba sharaxeen, oo mushahar shaqaalaha loo soo tababarey iyo qalabkii la inagu caawiyay markii hore laakiin wixii lagu hagaajin lahaa inaga looga baahan yahay loo hayo, markaa way cadahay mad-madawna kuma jiro sidii loo qaadayay iyo sidey u baxaysay dakhliga $10 ee xeerkani jideynayo.

Halkan waxaynu ku haynaa xeer ka kooban **9 Qodob** oo tilmaamaya dhamaantood sidey waajib tahay in qofka leh tigidh iyo kursi uu ku fariisto kana dhoofaya madaarada Somaliland uu bixiyo $10 ay ku waajibeyso, sida ay dhigayaan xeerarka caalimiga ah oo ka midyahay Caneva Convention oo tilmaamaya in duulimaadyada qofkasta oo leh tigidh iyo kursi in laga qaado takaaliifta noocan oo kale ah, inagase ay maanta inoogu horeyso.

Waxaan qabaa, Inuu Xeerkani yahay Xeer muhiima Qaranka Guud ahaa, iyadoo aan loo eegayn cid ka Shaqeysa iyo Wasaarad, takaaliifta uu tilmaamayaana qofkasta dalka koofaya ay waajib ku tahay.

Guddidu waxay soo qortey hadaan u galo, **Qodobka 4aad** waxay ka saareen qeyb ka mid ah, waxay ku dareen dadka da'doodu tahay 15 jir iyo wixii ka weyn inay waajib ku tahay in laga qaado $10, xeerkuna wuxuu dhigaya "*qofkastoo leh tigidh diyaaradeed inu bixiyo takaaliifta Maaliyadeed ee Xeerku jideeyay*", markaa waxaan aamin sanahay in hadii 15 jir wixii ka weyn laga dhigo waxaa muuqata in wixii la doonayay iyo waxa ka soo baxayaa aayey is dabooleyn, sidaa darteed sida Xeerarka Caalamiga ahiba dhigayaan in loo daayo sidii Xeerku ahaa, oo laga saaro soo jeedinta Guddida.

Sidoo kale, Gacan ku haynta adeegyada iyo ururinta takaaliifta, inaga waxaan xeerkan u sameynaynaa waa Wasaarada Duulista iyo Hawada oo ku shaqeyn doonta Qodobkan inta uu soo baxayo sidii Wasiirkuba sheegay inay jidka ku soo jirto Civil Aviation, waxaana fiican in wasaarada marka xeerka loo ansixiyo inaan la garba duubin oo iyada loo daayo cidey u igmaneyso iney lacagtaa ururiso ama qabato, halkan waxaa inoogu qoran in hay'ad local ah oo NASHA la yidhaahdo la gashay heshiis Wasaaradu.

Waxaad ogtihiin hay'ado fara-badan oo qarankani leeyahay dekada iyo baananka ay kharashka ay qabtaan isticmaalkooda iyo Qabashadoodaba ay iyagu u madax banaan yihiin, hase yeeshe sida Xeerarku Waajibanayaan ay auditka iyo Xisaabiyaha Guudba wixii soo galey iyo wixii ka baxay sida loo xisaabinayo, markaa waxaan leeyahay, ha loo daayo Wasaarada iney iyadu u madax banaanaato cidey u igmaneyso.

**Qodobka 6aad** Guddidu ay si kale u dhigtey waxaan aaminsanahay in sidii Xeerka Xukuumadu keentay ugu qornaa loo daayo, oo wax si khilaafsani ku jirin. **Qodobka 7aad** sida xeerku dhigayay hanta-dhawraha Guud iyadoon waxba loo dhimeynin sida shuruucda dalku jideysay, iney baadhista iyo dabagallka uu awood u leeyahay, markaa waxay sax ku tahay sida Xeerku dhigayay oo Guddidu waxay ka saartey sida Xeerarka dalku jideeyeen.

**Waxaan Soo jeedinayaa:-**

- Inagoo eegayna baahida loo qabo xeerkan iyadoon wax u dhimeyn muwaadiniinta in $10 ee lagu sugayo amniga madaarada dalka, in sida Xeerku dhigayo loo tixgaliyo oo loo ansixiyo.

6. **Md. Maxamud Jaamac Cilmi:-** Gudoomiye, waxa wax lagu ururinayo Sharciyan Dastuurka jideeyaye maaha wax jeebkena ka keenayno, waraaqadan i hortaala ee shaxeysan ee lagu ansixiyay $3 ee degreetadii lagu soo direy iyadoo sidaasa baa wasaaradu soo dirtey, iminkana $14 oo shaxeysnay baa ina horyaala, wasaarada waxaa xaq loogu lahaa 14 sidey ugu talo gashey iyadoo miisaniyd leh ee u soo qortey iney keento, tasina waa mid meesha ka maqan.

   Arrimohoo dhan waxay isugu soo ururayaan arrinka Miisaaniyada iyo arrinka C/qaadir Jirde yidhi ee nimankaa French ah, xaq waxaa la inoogu leeyahay waxaynu ansixineynaa iney sharci ku fadhiyaan, maaliyada markey noqoto, **Qodobka 55aad F/3aad** ee dastuurku wuxuu sheegayaa in Goluhu Jideeyo wasaarada Maaliyaduna u ururiso.

   Guddida dhaqaaluhu **$10** bay soo qoreen, xaqiiqan waxa la qaadaa waa **$14**, waliba waxay ka tagtey **$17** oo ku jira qof walboo tigidh loo goynayo, taasoo ah in qof walba uu tigidhkii ku tagayo **$33, taana mey soo qorin,** takaaliifta qofka tagaya marka uu airport is dhextaago waa $105, qofkii 10 qof watana waxay laga qaadayaa $1050 takaaliiftiisu oo aaney tigidhku ku jirin, waxay soo qoreen in laga reebo qofka 15 jir ka yar, sharcigu waxa weeye 18 jir qofka passport wata, marka halkaana 18 jir ha laga dhigo, tan kale ardeygu xuquuq gooniyuu leeyahay, marka uu dhoofayona waa in laga daayo.

Markaa 5 neef ee adhiga ah iyo Qofka madaarka ka dhoofayaa waa isku lacag, labada dibi iyo qofka dhoofayaa waa isku lacag, awrka iyo qofka dhoofayaa waa isku lacag, waxyaabaha mucjisada bay ka mid tahay in wixii hard currencyga dalka soo galineyay iyo qofka madixiisii ay isku lacag noqdaan, wasiirka waanu ka wada hadalney markii Guddidayadii loo saarey aanu aragney, waxaanu isla waa faqney oo uu afkiisa ka sheegay in lacagtaasi badan tahay, markaa dadka ha laga dhimo, oo sida iyagana wax ugu hagaagayaan, dadkana looga dhimo waxaan soo jeedinayaa in Qiimaha dadka laga qaadayo in **$5** laga dhigo.

Waxaan kaloo soo jeedinayaa, dawlada baynu nahay, dastuur baynu leenahay hay'ado diblomasiya inala jooga, cida loo ansixiyaa $10, bari safiirka wuxuu odhanayaa keen cashurtii, markaa waa in lagu daraa hay'adaha ajaanibka ah ee UNta ineyna ku jirin Cashuursan oo aan laga qaadin.

Miisaaniyada Wasaarada u qoran iyo Lacagta laga helayo cashuurtasi way is le'egtahay, Markaa waa in Lacagtaasi Miisaaniyada soo gashaa oo lagu daraa, waayo hay'ad madax banaan maaha waa wasaarad, Markaa iyadoo tafatiran inta la soo qoro waa iney gashaa Miisaaniyada Qaranka Lacagtaasi, ciidanka iyo intelengence oo ka khatarsan baa gashey miisaaniyadiiye, iyana waa iney soo qortaa oo qorataa wasaarada oo soo dalbatey

Halkan la leeyahay cidbaa loo qorey oo baadheysa alaabta iyo shandadaha, horta caalamku sidii hore maahee wuxuu horumarey oo qof aan aqoon u lahayn qalabka wax lagu qarxino ayaa loo dhiibaa, markaa nimankaas ayaa xaq u leh in loo dhiibo, markaa Waa in lagu daraa hay'ada iyo cida wax baadheysa iney yihiin diblumaasiyiin sirdoon oo hawsha cidii ku habooneyd ee garaneysay wax qarxa iyo cidii wax wada noqdaa kuwo aqoon u leh oo sirdoon ah.

**Waxaan kaga baxayaa:-**

- Waa in la keeno Xisaab xidhkii 5 bilood ee hore lacagtii la ururiyay iyo sida loo istimaaley intaan wax kale la galin, markaasey noqoneysaa kharash loo baahan yahay , waad mahadsantihiin.

7. **Md. Xariir Siciid Bulaale:-** waxaan qabaa in lifaaqa Guddidu keentay aanu ku iman shaqo gudasho ee uu ku yimi is af-garanwaa iyo isqabsigii dhexmarey Guddida iyo Wasaarada dhexmarey, xaq waxaan u leenahay ineynu $10 sharciyeyno ama diidno oo sharci-dejin baynu nahay, qofkuna haduu miisan iyo Passport leehay waxaa ku waajiba inuu bixiyo takaaliiftaas 3 jir amd 15 jir intuu doono ha noqdee.

   Ninka 3 dalka ka maqnaa ee lacagta la soo galaya in $10 la soo galayaa tacadi maaha, ileyn islaanta gaasta iibisa ayaa 1000/shilling laga qaadaaye, in shandadaha iyo qofka la baadho iyo qaabka wax baadho waa la soo bartaa, markaa waxaan leeyahay shirkada la siiyey hawshaas yaan la faragalin.

   ***Waxaan soo jeedinayaa:-***

   - *In Sida Xukuumadu u soo gudbisey Xeerka lagu ansixiyo.*

8. **Md. Jaamac Xasan Aadan:-** horta waxaynu nahay sharci-dejin, Wakiiladii dadkana waynu nahay, Xeerka markaan ku soo noqdo, horta sidaa hore loo sheegay markii lacagta la xisaabiyey $10 iyo $4 oo aan la soo dhigin oo sharci daro lagu qaado, wasiirkuna sheegay in la qaado $4 oo aan ahayn $3 aan hore u qaadney iyo $10 iminka in horyaal, markaa marka hore $4 ee sharci darada loo qaado aynu joojino intaan wax kale la galin.

   Markii iminka la xisaabiyay 6 bilyan ayay noqotey, Miisaaniyadana intii wasaarada ugu jirtey waxyaabaheedo dhan waxay noqotey 5 bilyan iyo 900 milyan, markaa waxaa ka badan lacagta la qaado, wuxu wasiirku inoo sheegay culeyska saaran inuu yahay 50 shaqaale oo cusub oo la tababarey sidey u shaqeyan mushaharkoodu wuxuu noqonayaa ileyn shaqaalihii kale waa sidoodiiye marka loo qeybiyo waa $20,000 markey min $500 qaataan siduu sheegayay inta kale waa dheeraad.

   Sidaa darteed. Waxaan ayidsanahay hadaan laga maarmeyn in laga dhigo lacagta $5 oo kaliya, da'dana waxaan ku raacsanahay in laga dhigo 18 jir, waayo qof 18 jir ka yiri lacag ma haysto oo waalidkaa u haysa, waxaan kaloo soo jeedinayaa in sanadka danbe Miisaaniyada lagu soo daraa, sidoo kale waa in la waafajiyo Xeerarka Maaliyada ee Dalka, halka la leeyahay Qodobka 8aad Xeer-nidaamiyaha Gabigiisaba waa in

xeerka laga saaro ee la leeyahay Wasiirku xeer-nidaamiye ha u sameysto sida lacagta loo isticmalayo waana in sharciyada Maaliyda la raaco.

Lacagta la inagu caawiyay waa in iyana laga keeno xisaab calin oo intii qalabka lagu iibiyay mooyee intii kale sidey u baxdey la keeno ileyn waa lacag la ingu caawiyee.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Lacagta laga dhigo $5, da'da laga qaadayona 18 jir, ardeydana laga daayo, sanadka danbena Miisaaniayda lagu soo daro, $4 ee la leeyahay immigration baa qaada ee aan la ansixina gabigeedaba la laalo.

9. **Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-** horta Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, Xeerkan oo ah Xeerka Takaaliifta Aminga Madaarada, laba qodob oo yar yar ayaan is kortaagayaa, Horta waxaa haboon inaynu isweydiino Xeerkani ma yahay Xeer xoojinaya Amniga Madaaradeena iyo Mandaqada Guud ahaan, ninwalba meelo yar yar buu wax ka eegayaa, waxaynu isku waa faqsanahay in xeerkani yahay muhiim oo ilaalinaya Security Amniga madaarada iyo Mandaqada oo ah mid muhiima Xidhiidhka aynu la neehay caalamka.

   Lacagta cida laga qaadayaa waxaynu ognahay inuu awoodo oo ninka dhoofaya ee dibada ka yimi ama Ganacsade ah waa dadka la doonayo iney dalka wuxuu ku horumarayay qaybka ahaadaan, dalkasta wuxuu ku hormaraa lacagta cashuurta ee la qaado, waxaana laga qadaa dadka wax haysta, lacagta cashuurta ah ee dalkeena waxaa laga qaadaa islaanta waxba haysan ee tobaandhada miiseysa.

   Isma gasho aynu horumarno iyo cidii horumarka ka shaqeynaysay aynu ku shimbira waaqleyno, anigu waxaan wasiirka aad ugu hambalyaynayaa intuu xilka hayay madaarada wax la taaban karaa ka muuqda, Xaaji Aadan wuxuu yidhi, lacagtan iyada ahina waa figrad saliima oo u baahan in la qaado oo waayo dalkey anfaceysaa, dalku wuxuu ku hagaagayaa oo qofka wax mucaaradaya wax

anfacayaa, marka aynu wax wanaagsana wada raacno wixii xuna meel uga soo wada jeedsano.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- *In Xeerkani Amniga Madaarada Dalka iyo Mandaqada uu muhiim u yahay, Xeerkana Sidii Xukuumadu ku soo Gudbisey lagu Ansixiyo*

10. **Md. Siciid Cilmi Rooble**:- waxan ku hambalyaynayaa Wasiirka iyo Shaqaalihiisa horumarka ay qarankan ka sameeyeen waan ku hambalyaynayaa, tan kale dad baa ka hadlaya maxay NAASHA ahayd, NAASHA iyadaa iminkaba ka shaqeysa madaarada oo maaha mid iminka dibada laga keenay, waa shirkad ay etopia airline aqoonsatey, hadii la yidhi ilaa inta aynu sameynayno Civil Avitaion hawsha madaarka ha dhaqaajiso, maxaa loo sheeganayaa.

    Tan kale waxa weeye qurba jooga ee **$10** laga qaadayo nabadgalyadiisa ayaa la ilaalinayaa, waa u amaan, mida kale waxaa soo eeganaya diyaaradihii, waad ogeydeen in itopian airline amni-dor darteed u joojisey duulimaadkii barigii, tan xisaabta aad ka hadasheen waxaa loo raacayaa qaabka hantidhowraha Guud iyana way qoran tahay oo Sharcigas ayaa loo raacayaa.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- *In Xeerka sidii xukuumadu ku keentay loo ansixiyo.*

***<u>Maalintii labaad ee dooda mudanayaasha</u>.*** ***29/01/2013***

11. ***Mw. Baar Siciid Faarax:-*** anigu marka hore arrinta waxaan u arkaa wax khalada oo aney umadu qaadi Karin, dalkeena waxaa ka dhoofa dad badan oo jilicsan kuwo caafimaad loo wado oo dhibaato caafimaad u baxaya, iminka xaalado adag bey u dhoofaan, Gudidduna kumey darin dadka laga reebayo sida kuwan da'da yar oo waxay ahayd in dadka caafimaadka iyo dhibaatooyinka u baxayay lagu daro, mar mar ilaa 30 qof oo caafimaad loo qaadey baa diraada la saaraa.

Anigu waxaan leeyahay dadkeenu ma karaan lacagtaa ama Dibad ha ka yimaadaan ama Gudaha ha ka dhoofaane, lacag miisaaniyada gashana maaha Ha la joojiyo ayaan leeyahay lacagtaa, dadkii ina soo doortey wax dhiba u keenaya yeynaan u ogalaan, hadii arrinku iska yahay aynu iska ansixiyno waa inagu ceeb, saaka halkan waxaan ku arkey shaqaale hoosaad wasaarada duulista iyo hawada ka tirsan, waxayna ka cabanayeen mushahar, markaa hadii shaqaale wax loo doonayo halkan ayaan lagu soo dari lahaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Lacagtaas looma baahna, waa mid baadila oo umadu qaadi Karin markaa ha la joojiyaan leeyahay.

12. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** shirgudoonka iyo mudanayaasha dhamaantiin waad salaamantihiin, xeerkani waa xeer amni ku saabsan wixii amni ku saabsan waxa weeyey inaynu ansixino, oo hagaajino ayaa loo baahan yahay, maanta Golaha ama Wasaaradaha waxaa laga hadlayaa go'aankii ingriisku soo saarey, sababtuna waa amnigii oo sidiisi loo ilaalin waayay, dadka dhoofaya ee 10 nabadgalyadiisa lagu ilaalinayo in laga hadlo maaha.

Halka la leeyahay 15 jirka waxaan leeyahay sideedii ha la daayo, Qodobka laga saarey ee Xeer-nidaamiyha waa loo ogolyahay inuu Wasiirku sameeyo Xeer-nidaamiye, markaa sidaa ha loo daayo.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkii xukuumadu keentay sidiisa halagu ansixiyo ayaan qabaa.

13. **Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** marka hore waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka, Xeerkan ina horyaal ee Amniga Madaarada waa waajib ina saaran in nabadgalyada la ilaaliyo oo xukuumadu ilaaliso, Xeerkanina wuxuu sheegayaa in amniga madaarada oo ah meelaha ugu muhiimsan in la ilaaliyo ay tahay, waxaa madaarka ka hawlgala hay'ado badan oo nabadgalyo, aqoon iyo khibrad bay u leeyihiin hadii wax dhacaan iney ka hortagaan, kuwaas oo booliis iyo sirdoonba leh, waxaan aaminsanahay in aan loo baahneyn in cidkale lagu soo kordhiyo, oo intaasi hanankarto hadii iyaga la hagaajiyo.

Markaan dib ugu soo noqdo takaaliifta meesha ku qoran, waxaan ku darayaa qeyb xeerka oo waxaan ka dhigayaa, Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada iyo Golayaasha Sharci-dejinta oo u baahan iyana in la ilaaliyo, waayo maanta Golayaasheenii way dayacan yihiin amni-ahaan.

Lacagta $10 ah waxaan ku talinayaa in laga yareeyo oo laga dhigo $5 oo kaliya miisaaniyadana lagu daro, Qodobka kale ee Xildhibaanku ka hadlay ee Xeer-nidaamiyaha waxaan soo jeedinaya inaan loo baahneyn oo sharciga lagu dhaqo ileyn sharci baynu leenahay, **Qodobka 5aad** ee Gudiddu soo badashey waxaan qabaa in Gudiddu sidey u soo dhigtay in lagu daayo oo lagu daro iyo Xukuumada, markaan leeyahay Xukuumada waxa shaqeynayaa ee hawsha qabanaeysaa waa iyada, iminka kuwa wax baadhaya ee hablaha iyo raga cidey ka socdaan garan meysid markaa shaqada cidii lahayd ha loo dayo.

Qodobka da'da waxaan leehayay in laga dhigo **15 jir wixii ka wayn**, halka gudiddu ka tidhi **15 iyo wixii ka weyn**, sidoo kale ma haboona iyaga ardeyda iyo dadka xanuunsanaya in wax la weydiiyo oo iyagana ha laga reebo ayaan leeyahay.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In lacagtaa laga dhigo $5 oo kaliya hadey secondment hesho, waad mahadsan tihiin.

14. **Md. Cali Maxamed Aadan:-** marka hore Gudoomiye iyo Mudanayaal waad salaaman tihiin, Xeerkani wuxuu ku yimi baahida uu halkan inooga cadeeyay Wasiirku, marka hore halaka qaado laba arrimood oo

kala ah, Qaadista Lacagta iyo Xeerka ina horyaal, qaadistu horey u bilaabmatey laakin manteynu haynaa Xeerkii lagu sharciyeyn lahaa, lacagta hore loo qaadeyna hay'adaha ay khuseyso hakal xisaabtamaan oo hadaba galaan meeshay martey iyo sidey u baxdey.

Saddex arrimood baa ina horyaal, Mid Xeerka Xukuumadu soo gudbisey, mid waa Warbixinta Gudiddu keentay, tan kalena waa fikradaha Dooda mudanayaasha ka soo baxeysa, markaa anigu Xeerkii Xukuumadu keentay baan soo jeedinayaa waana sababeynayaa anigoo sharciyan u cuskanaya.

**Qodobka 4aad** ee dadka laga qaadayo lacagta ee Gudiddu 15 ku soo xadideen anigu waxaan qabaa in qofkasta oo tigidhka leh, miisaana leh in laga qaado lacagta, waayo dayac tirka qalabka wax lagu baadhayo iyo mushaharka shaqaalaha ayay noqoneysaa sidii halkaa wasiirku inoogu sheegay, **Qodobka 5aad F/2aad**, waxaan ku waafaqsanahay in hay'adaha la dhisidoono ee madaxbanaan halkan kuma haboona ayaan qabaa, Hay'ada laga Hadley ee NAASHA ma jirto wax u diidaya in wasaaradu u igmato, waana hay'ad Local ah, tan Xeer-nidaamiyaha sharci kasta oo aynu soo saarno xeer-nidaamiyuu leeyahay.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In sidii Xukuumadu u soo gudbisey loo ansixiyo, waad mahadsantihiiin.

**15. Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** Marka hore waad salaamantihiin, waxaynu ka hadleynaa waa Takaaliifta Amniga Madaarada, Mudanayaal waynu ognahay Xaalada taagan maanta, saaka waad ogtihiin oo nin hakan joojigi jirey wuxuu ka sheegay Somaliland waad maqleyseen in uu shaaciyay isagoo leh Xaalada Amniga dalka ma fiicna, meeshuu ka waramey waynu ku noolnahoo waynu joognaa, dalkuna waa amaan oo dhibi kama jirno, xaaladaas baa maanta taal, teynu ka hadleynaana waa Nabadgalyada madaarada ha la adkeeyo oo wixii lagu adkeyn lahaana dadka dhoofaya halaga ururiyo, qofka dhoofayaana waa mid awood u leh inuu bixiyo.

Waynu ognahay hadeynu eegno Ethopian airline oo duulimad keedii dalka joojisey amniga awgeed, iyagaa baadhi jirey madaxdeena oo intey

qalabkooda ku baadhaan sidey doonaan yeeli jirey, Wasaarada halkaa waan ugu sacbiney warbixintiisiii, sidey lacagtu u baxdey iyo waxay wax ka qaadeen wuu inoo sheegay, waa wax loo baahan yahay baan qabaa in la sameeyo qalabkaa iyo baadhistaa amniga lagu adkeynayo, waana ineynu amniga kawada shaqeyno.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Xeerka sidii xukuumada loo ansixiyo oo aanu ku jirin qodobka hay'ad baa wax sameyn doonta, laguma daro NAASHA oo la yidhaahdo Cidbaa wax sameynaysa.

**16. Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** marka hore waan soo dhoweynayaa arragtiyaha mudanayaasha, waxaynu halkan u fadhinaa ineynu doodeena ka dhiibano hadba xeerka ina horyaala, waynu ku leenahay waajibaad xisaabtameed, markeynu la xisaabtameyno waa ineynu yeelanaa waxaynu kula xisaabtameyno, Xeerkii baa ina horyaal oo marka hore waxa la eegaa Mabaadiida Xeerka, hadeynu mabaadiida xeerka ku qanacno waa sax, wuxuu ka hadlayaa Nabadgalyada Madaarada waana meelaha ugu muhiimsan ee aynu caalamka xidhiidhka kala leenahay, markaa waa in la qadariyaa.

Xalay go'aankii soo baxay waad ogeydeen ee ingiriiska waxayna ahayd sababo nabadgalayo, markaa waxaynu u baahanahay inaynu ilaalino nabadgalyada madaarada, waxay u baahan tahayna sameyno, markeynu eegno Xeerka si bey xukuumadu ku soo gudbisey, Gudidduna soo jeedin bay soo raacisey, Qodobka hore ee cida laga qaadayo, marka hore Gudiddu way soo aqbaleen in $10ka la qaado, markaa **Qodobka 4aad** waxaan leeyahay sida Xukuumada ayaan ku raacsanahay, kan gudiddana waan ka saarayaa oo qofku waa haduu sito tigidh miisaana leeyahay way ku wajibtey.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Xeerka sidii Xukuumadu ku soo gudbisey loo ansixiyo, hadeynu dooneyno la xisaabtan xukuumada, horta Gudidyo la xisaaban baynu leenahay, waxaa jira hantidhowre, shaley halkan waxaan ka ansixiney Guddi la dagaalan musuqmaasuq, iyagu ha soo baadhaan, laakiin aynu ka deyno xeerka leexinta.

**17. Md. Axmed Maxamed Kijaandhe:-** Marka hore Gudoomiyaha iyo mudanaasha waan salaamaya, marka hore Xeerka xukuumada inoo soo gudbisey iyo Soo jeedinta Gudidda waxaan taageerayaa farsamo ahaan kii Xukuumadu soo gudbisey, waxaynu dooneynaa dawladu inay wax qabato waxayna ku qabaneysaa lacag, markaa Lacagtaa waa in loo ogolaado ayaan qabaa, dadka laga qaadayaa waa dad awoodi kara oo dalka inta badan ka maqan, markaa waxaan odhan lahaa iney markey yimaaddaan dawlada ku controbutegareeyaaan weeye.

Anigu ma lihi lacagta sidii la doono ha loo isticmaalo, waa in Golahani daba galaa sida lacagta loo isticmaalayo, laakiin Lacagta ha loo ogolaado, Wasiirku wax badan buu qabtey markaa qofkii wax qabta yaynaan la hadhin, xilkeenana aan ka gudano, waa ineynu u gacan banaynaa Xukuumada iney u wakiilan karto inaguna iyadeynu ku ognahay oo kala xisaabtameynaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Waxaan taageerayaa In xeerkii Xukuumadu inoo soo gudbiyay loo ansixiyo.

**18. Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:-**

Laba arrimood baan wax ka taabanayaa, midi waa takaaliifta wasaaradu ay dooneyso, midna waa hay'ad cusub nabadgalyo ee Wasaaradu dooneyso, had iyo jeer Somali ahaan mid baa inaga khaldan meel aan wax laga bilaabin beynu ka bilawnaa, 10 oo takaaliifa aad bey u badan tahay qiyaasna kuma fadhido, halgu soo celiyo $5 kaliya ka dibna aan aragno mushkilad maaha hadii wax ka soo baxaan waa la badali karaa, Fikrad ah Wakaalada Amniga ee Wasaaradu dooneyso had iyo jeer ma shaqeyso in la sameeyo wax overlap ah, waxaynu leenahay Ciidamo diyaar inoo ah tababaran oo shaqeysa, inteynu hay'ad iyo wax cusub isku rareyno iyaga kaga haboon wakaalad waxay noqoneyso.

Hadaan u noqdo, xisaabta lacagta shaley c/laahi wuxuu keenay xisaab ah in lacagta la qaadey ay ka badan tahay laban laab lacagtii Miisaaniyada ugu jirtey.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In lacagta $5 laga dhigo, Wakaalda Wasaaradu dooneysona looma baahnee, Ciidamada kaga haboone iyaga laga dhigo kuwa wax baadhaya.

**19. Md. Mataan Maxamed Hoori:-** horta Gudoomiye iyo Xildhibaano waan idin salaamey, Dooda Xeerkan waan ku raagney oo wakhti badan buu inaga qaadey, waana $10 oo amaanka lagu ilaalinayo, dee waxaa la qaadaa lacago ka badan oo awalba aan sharciyeysnayne maxaynu ku haysanaa hadii amnigii madaaradeena lagu ilaalinayo oo ay taha mid anfaceysa dalka, anigu waxaan leeyahay $10 aan iska siideyno oo Wasiirkii wuu inaga qanciyay sida ku baxayso iyo in aad ugu baahanyihiine aan ansixino.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Xeerkan lagu ansixiyo sidey markii hore Wasaaradu ku soo gudbisey.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
- ----------------------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
---------------------------------------------------

-.